

KU SOO DHAWOOW MACHADKA HORUMARINTA AADANAHA IYO NAAFADA


Ciwaanka dhismaha ahaaneed ee dhismaha kilinikada IHDD waa 1701 NE Columbia RD. Dhismuhu wuxuu ka dambeeyaa Xarunta Caafimaadka ee UW oo ku taal dhammaadka koonfureed ee kambaska Jaamacadda Washington

KA IMANAAYA INTERSTATE 5 (I-5)

- Qaado bixitaanka NE 45th St
 - Wajahaaya Waqooyi: Midig ugu leexo NE 45th St
 - Wajahaaya Koonfur: Bidix ugu leexo NE 45th St
- Ku soco ilaa 15th Ave NE (qiyaastii 4 baloog)
- Midig ugu leexo 15th Ave NE (qiyaastii 7 baloog)
- Joog laynka midigta fog si aad uga gudubto NE Pacific St (wado weyn oo leh nalalka taraafikada)
- Waddada 15th Avenue waxay ku dhammaan doontaa calaamadda joogsiga (stop sign)
- Bidix ugu leexo (bari) Boat St
- Hoos ka eeg qaybta macluumaadka lacag bixinta

KA IMANAAYA HIGHWAY 520 (WAJAHAYA GALBEED)

- Qaado Bixitaanka 100 oo gal Montlake Blvd NE
- Ka gudub Buundada Montlake
- Laynka bidix qabso
- Bidix ugu leexo NE Pacific St
- Ka soo gudub oo soo dhaaf Xarunta Caafimaadka UW ee bidixdaada ilaa aad ka gaarto nalka 15th Ave NE
- Bidix ugu leexo 15th Ave NE
- Waddada 15th Avenue waxay ku dhammaan doontaa calaamadda joogsiga (stop sign)
- Bidix ugu leexo (bari) Boat St
- Hoos ka eeg qaybta macluumaadka lacag bixinta



GARAASHKA KAMBASKA KOONFUREED

- Baarkinka ugu weyn ee IHDD waa Garaashka Kambaska Koonfureed oo ku yaal dhabarka dambe ee UWMC, galbeedka dhismaha IHDD.
 - Ka sare/ level-ka waddadu waa S-01. Level-ka dhexe waa S-02. Level-ka hoose waa S-03.
- Ka soo gal baarkin lot-ka xaga wadada 15th Ave NE. Calaamadda joogsiga, u soo soco bidix dhanka Boat St oo istaag mid ka mid ah waababka baarkinka (Gatehouse #6).
- Xitaa haddii calaamadda LOT FULL banaanka taalo, u sii gudub waabka (booth) oo weydii baarkinka bukaanka ee IHDD.
- IHDD waxay bari ka xigtaa garaashka baarkinka. Dhigo baabuurka xagga bariga ugu soo fog ee Baarkinka S-01 intii aad awoodid si aad u yarayso masaafada socodka.

BAARKINKA NAAFADA

- Kuwa haysta Kaarka Naafada ee Gobolka waxay isticmaali karaan boosaska dadka naafada ah ee S-02 (Level-ka dhexe).
- Weydii shaqaalaha albaabka laga soo galo (Gatehouse) jihooyinka boosaska baarkinka naafada.
- Waa inaad weli bixisaa lacagta baarkinka ee S-02, xitaa haddii aad haysato Kaarka Naafada Gobolka.

MACLUUMAADKA LACAG-BIXINTA

- Waa inaad horay u sii bixisaa si aad u dhigato Level-kasta oo ka mid ah Garaashka Kambaska Koonfureed (S-01/S-02/S-03).
- Joogso Gaydhka 6 (Gatehouse 6) oo u sheeg shaqaalaha inaad ballan ku leedahay IHDD oo aad u baahan tahay ruqsad (permit).
- Waxay ku siin doonaan ruqsad (permit) iyo QR koodh gaar ah si aad u gasho level-ka S-03 haddii level-ka S-02 uu buuxo.
 - Waxaad u baahan doontaa QR koodh si aad u gasho ugana baxdo level-ka S-03. Ruqsada (Permit-ka) ku dhaaf dashboodhkaaga si aad uga fogaato in tigidh lagu siiyo.

ANSIXINTA (Validation)

- Bukaanka UWMC waxay dalban karaan kuubanka soo celinta qayb ahaan (partial refund) markaad is xaadirneysid haddii aad horay u soo bixisay in ka badan \$10.
- Wax lacag ah oo qayb ah lama soo celinayo haddii aad isticmaasho "Pay By Phone" level-ka S-01 (level-ka wadada).

KA SOO LUGEYNTA GARAASHKA KAMBASKA KOONFUREED ILAA IHDD

- Ka bax dhanka fog (bari) dhamaadka Garaashka Kambaska Koonfureed.
- Ka gal dhismaha Kiliniga IHDD albaabka dhinaca.
- Raadi oo fiiri shiraaca leh magaca dhismaha (Institute on Human Development and Disability).
- Markaad gudaha gasho, raac calaamadaha wiishka (elevator-ka) oo kor ugu kac dabaqa labaad si aad isaga xaadiriso miiska hore.
- Taa beddelkeeda, isticmaal marinka (ramp-ka) albaabka hore ee geeska NE Columbia Rd & Ferry Pl NE.

Machadka Horumarinta Aadanaha iyo Naafada

(Institute on Human Development and Disability)

1701 NE Columbia Rd

Seattle, WA 98195-7920

Taleefon: 206.598.4317 | fax: 206.598.7815

website: www.ihdd.org